

LIISKA BADBAADADA DABKA JIILAALKII

Fact Sheet 13 – Community Risk Management. Revised 28/09/2004 – Somali

- NSW FIRE BRIGADES
- NSW RURAL FIRE SERVICE
- ACT FIRE BRIGADE
- ACT RURAL FIRE SERVICE

XAQIIQADA

Sannadkii hore 4339 guri ayuu dab qabsaday NSW, waxaana ku dhintay ugu yaraan 20 qof waxaana ku dhaawacmay 573 kale. qiyaas ahaan 1300 dababkaaasi , ama 30% waxay dhacaan bilaha jiilaalka.
(Statistics correct as of 04/06/04)

GURIGAAGU MA KA BADBAADSANYHAY DABKA JIILAALKII?

Waxaanu ku talinaynaa liis badbaado oo sahlan si aad gurigaaga uga dhigto midbadbaadsan xiliga jiilaalka. Hubi in qof kasta oo guriga ku nooli uu raaco talooyinka badbaado ee soo socda:

- Muhiimad ahaan, ku samayso tiro ku haboon oo alaamka qiiqa ah guriga oo dhan hubina inaad mar kasta u tijaabiso si joogto ah.
- Hubi in uu qoyskaagu yaqaano laba meelood oo badbaadsan oo aad ka bixi karto qolka gurigaaga.
- Hayso qorshaha sabatobaxa oo qoran si joogto ahna u samee waa intaas oo dab dhacaayee.
- Waligaa ha ka ag tagin wax karsamaya.
- Haddii aad leedahay meesha dabka lagu shido hubi in meesha qiiqu ka baxaa nadiif tahay.
- Haddi aad leedahay meesha dabka lagu shido dahaadh ku samee xaggiisa hore marka la isticmaalayso.
- Ka hubi bustaha korontada iyo waayirada wax dilaaca ka hor intaanad sariirta saarin.
- Ka taxadir inaad ka ilaaliso daahyada, marooyinka miiska iyo sariirta inay u dhawaadaan Kulayliyaha.
- Ku diyaarso maro qoyan meel u jirta 1 mitir kulayliyaha ama meesha dabka lagu shido. Waligaa ha ka ag tagin.
- Haddii aad haysato mishiinka qalajiyaha dharka hubi in filtarku nadiifyahay markasta oo aad isticmaalayso.
- Isticmaal awooda hal iswij bakhtiina mark aanad isticmaalayn.
- Markasta shamaca bakhtii ama wixii kale ee ololaya ka hor intaanad seexanin.

**WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH LA XIRIIR XARUNTA DABDAMISKA AMA ILAALINTA DABKA
DEGMADAADA AMA FIIRI WEBSITEKA**

www.fire.nsw.gov.au www.rfs.nsw.gov.au ama www.esa.act.gov.au

TILMAAMAHA BADBAADADA DABKA JIILAALKII

- Si aad u tijaabiso bustaha korontada si siman ugu fidi sariirta, ha daaraadana ilaa shan daqiiqo ka hor intaanad sariirta saarin si aad u hubiso inuu si fiican u shaqaynayo.
- Isticmaal oo kaliya koronto yaqaan oglaansho haysta marka aad qalabka kulaylinta samaysanaysid.
- Qalabka kulaylinta lagu isticmaalo saliida, gaasta ama xaabadu wuxuu u baahanyahay dayac tir iyo hubin sannad kasta.
- Isticmaal fuyuusyada loogu tala galay oo kaliya badbaadada iswiiyada korontada.
- Haddii ay suurta geltaahay, dab bakhtiyaha iyo bustaha dabka dhiga meesha laga baxo.

WIXII ARRIN DEGDEG AH TILIFOONI 000